

Da'da uqalmitaanka tallaalka AstaraSeneka (AstraZeneca) oo hoos ugu dhacayaa da'da 40

Abriil 19, 2021

Laga bilaabo Abriil 20, dadka reer Alberta oo da'doodu tahay 40 ama ka weyn waxay awoodi doonaan inay helaan tallaalka AstaraSeneka (AstraZeneca).

Farmashiyayaasha kaqeyb qaadanaya iyo Adeegyada Caafimaadka Alberta waxay bilaabi doonaan qabashada ballamaha tallaalka AstaraSeneka (AstraZeneca) ee loogu talagay daka reer Alberta oo dhashay 1981 ama kahor. Tallaalada ayaa laga heli doonaa goobaha caafimaadka aan balama u baahneyn ee Edmonton iyo Kaalgari (Calgary), iyo sidoo kale farmashiyeyaal gaar ah oo ku baahsan gobolka oo dhan.

Yaraynta da'da u qalmitaanka macnaheedu waa 575,425 dheeraad ah oo reer Alberta ah ayaa la tallaali karaa, taasoo ka dhigeysa wadarta dadka u qalma 2.3 milyan.

Go'aanka Alberta ee lagu yareynayo da'da u qalmitaanka AstaraSeneka (AstraZeneca) laga bilaabo 55 illaa 40 waxay ku saleysan tahay talooyinka caafimaadka bulshada iyadoo la fiirinayo faa'iidada tallaalkan la siinayo ee lagu miisaamayo halista yar ee dhacdooyinka xun ee tallaalkan. AstaraSeneka (AstraZeneca) waxuu muujiyey inay yareyneyso infekshinka boqolkiiba 60-70, iyo natiijooyinka daran sida isbitaal dhigista boqolkiiba 80.

Laga bilaabo Abriil 17, in ka badan 100,000 oo qiyaasta AstaraSeneka (AstraZeneca) ayaa la qaatay waxaana jira in ka badan 170,000 oo qiyaasood oo la heli karo.

Dawladda Alberta waxay ka jawaabaysaa faafida KOOFID-19 iyada oo ilaalinaysa nolosha iyo habnololeedka iyada oo tilaabooyin sax ah u mareysa, joogtaynta ganacsiyada yaryar iyo ilaalinta nidaamka daryeelka caafimaadka ee Alberta.

Macluumaadka la xiriira

- Xogta tallaalka ([Vaccine information](#))
- Aaladda ballansashada Adeegyada Caafimaadka Alberta ee ([AHS online booking tool](#))

Weydiimaha warbaahinta

[Tom McMillan](#)

780-422-4905

Kaaliyaha Xoghayaha Isgaarsiinta, Caafimaadka Alberta

Si aad u hesho ilo badan oo dowladda loo turjumay, fadlan booqo: <https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx>.